

**census**  
2021

# Caawinta qof kasta inuu ka qayb qaato Tirakoobka 2021

**Tirakoobku wuxuu dhacayaa Maarso 2021.  
In aad ka qayb qaadato, dadka kalena ku dhiirigeliso  
inay sidaas oo kale sameeyaan, waxaad gacan ka  
geysanaysaa hubinta in adiga iyo bulshadaadu  
heshaan adeegyada aad u baahan tihiin.**

## Waa maxay tirakoobku?

Waa xog ururin dhacda 10 sano oo kasta oo sawir inaga siisa dhammaan dadka iyo qoysaska ku nool England iyo Wales.

Xildhibaanada golaha deegaanka, ururada samafal iyo ururo kale oo badan ayaa macluumaadka tirakoobka u isticmaala inay ku go'aamiyaan sida ay balaayiin gini sannad kasta ugu bixinayaan adeegyada.

Tan waxaa ku jira ku bixinta gaadiidka, waxbarashada iyo daryeelka caafimaadka. Si loo hubiyo in lacagtan lagu bixiyo halka loogu baahi badan yahay, waa muhiim in tirakoobku tiriyo qof walba.



## Gargaarkaagu macno ayuu samaynayaa


Waxaanu fahansanahay in dhisidda cilaqaad wanaagsan oo lala yeesho bulshada uu macnaheedu yahay in dad badan ay doonayaan inay ka qayb qaataan tirakoobka.

Waxaanu sidoo kale fahansanayahay in aan cidina u aqoon bulshadaada si ka fiican sida aad adigu u taqaan. Gargaarka ka imanaya hoggaamiyeyaasha maxalii ah iyo wakiilada bulshada oo lagu kalsoon yahay ayaa lama huraan u noqon doonta in dadku ka qayn qaataan.

## Dhisidda iskuxirka bulshada

Waxaanu u baahanahay caawimadaada si aanu u gaarhno dadka ugu badan ee ka qay qaata Tirakoobka 2021.

Shaqaalahayaga la shaqaynta bulshada maxalliga ah ayaa la heli karaa inta uu tirakoobku socdo oo dhan, iyadoo laga helayo xogo, talobixin iyo gargaar hawl qabasho oo qof kasta ka taageeraysa inuu ka qayb qaato.



## Aqoon

Waxaad fahan gaar ah u leedahay danaha bulshadaada iyo caqabadaha ay wajahaan. Aqoontani waxay noo ogolaanaysaa in aanu qorshayno gargaar qof kasta ka taageeraysa inuu ka qayb qaato.

## Wacyi gelin

Xiriirkaaga bulshadu wuxuu naga caawin karaa faafinta warka ku saabsan waxa uu tirakoobku yahay iyo sababta uu qof kasta macno ugu leeyahay. Tani waxay dhisi doontaa kalsooni lagu kalsoonaado tirakoobka, waxayna kor u qaadaysaa caawimada.

## Gaaritaan

Shabakadaada xiriir waxay naga caawin kartaa in aanu gaadhno dadka bulshadaada ee u baahan gargaar si ay uga qayb qaataan. Tani waxay hubin doontaa in lagu darey.

## Hel wax ka badan

Wax badan ka ogow wada shaqaynta si aad ugu gargaarto bulshadaada.

Wax badan oo ku saabsan tirakoobka ka akhri [www.census.gov.uk](http://www.census.gov.uk)

La soco tirakoobka @Census2021

